Lam: MW/DPS/MM/99, Luulyo 10.10.1999 photo copy


# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA**

**لولاية أرض بونت الصومالية**

6

**Lam, 10**

Sannadka 1 aad Garoowe, 1da Octoober 1999

**جريدة شهرية**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. **Qiimaha qoritaanka F.R.** halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


**TUSMADA**

**Qaybta Koowaad**

**SHARCI**

Waxba ma leh

Qaybta Labaad

**Xeer**


- **Xeer Madaxweynaha D.G.P.S.** – lam. MW/DPS/MM/99 ee Luulyo 10,1999 " U gudbinta dakhliga dowladda ee la qabto oo dhan 24 saac gudahood, khasnadda dhexe ama qaybta dakhliga berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ee ugu how"........................................ Bogga......... 130
- **Xeer Madaxweynaha - D.G.P.S.** Lam. 44 ee Augst 20, 99 "Magacaabidda Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Howlaha Guud iyo Gaadiika"........................................Bogga............132


**Qaybta Saddexaad**

**Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.**

Waxba ma leh

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**

Sum: MW/D/PS/1LM/99

Garoowe, Luulyo 10,1999

Madaxweynaha Dawlad Gobolleedka Puntland:
Markuu arkay Axdiga Dawlad Gobolleedka Puntland qodobka 12.5
Markuu arkay Sharciyada iyo Xeer-nidaamiyaha u degsan xisaabaha dawladda.
Markuu arkay Xeerarka iyo habraacyada u degsan hubinta, uruurinta iyo soo xeraynta dakhliga dawladda (cashuuraha, xuquuqaha {rights}, hantida, khidmadda, iwm).
Markuu arkay Sharciga miisaaniyadda dawladda
Markuu arkay Xaaladda miisaaniyadeed ee dalku ku sugan yahay
Markuu arkay Talo soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda ee la xiriirta "sugidda xasilloonida miisaaniyadda" (financial stability).
Markuu tixgeliyey duruufaha guud ee maaliyadda dawladda Puntland

Madaxweynaha Dawladdu wuxuu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1-aad

1. Waa in hay'adaha, wasaaradaha iyo maamullada madaxa bannaan ee D.G. Puntland ee farsamo ahaan (for technical reasons) u qabta dakhli dawladda u sharcigaroobay, ay wadar ahaan dakhliga soo gala u gudbiyaan 24 saacadood gudahood khasnadda dhexe ama qaybta dakhliga birriga ee wasaaradda maaliyadda ee ugu dhow.
2. Waxaa la mamnuucay in hay'ad ama xafiis dawladeed oo aan ka tirsanayn Wasaaradda maaliyadda ay ku baajiso khasnadaheeda gaar ahaaneed "dakhli dawladdu leedahay" oo aan sharcigu u ogolaan muddo ka badan 24 saacadood.

Qodobka 2-aad

1. Isticmaalka dakhliga iyo isu-tuuridda dakhliga iyo kharajka waxaa loo aqoonsanayaa Xatooyo xoolo dadweyne.
2. Qayb kasta oo dawladda ka mid ah waxaa waajib ku ah in ay raacdo nidaamka maamulka maaliyadda dawladda ee xeerinaya in kharajka hay'aduhu ku jaango' naado ku talogalka miisaaniyadda, dakhliguna si toos ah ugu ururo khasnadda dawladda.

Qodobka 3-aad

1. Wasaaradda maaliyaddu waxay ku amran tahay xilna ka saaran yahay hagidda in ay la socoto warbixinna ka soo saarto lacagaha qaybaha kale ee dawladda ku soo xerooda ayna tahay in ay miisaaniyadda dhexe ku soo wareegto.
2. Wasaaraddu waxay tallaabo maamul oo sharciga waafaqsan ka qaadi kartaa xafiis kasta oo dawladda ka tirsan dakhlina uu ku soo ururo haddii uu raaci waayo sharciga miisaaniyadda dhexe ee Dawlad.

Qodobka 4-aad

1. Wasaaradda maaliyaddu waa in ay gaarsiisaa dhammaan xafiisyada dakhliga soo saara wareegto tifaf-tiran oo loogu tilmaamayo habraaca (procedure) iyo diiwaannada rasmiga ah ee loo isticmaalayo uruurinta iyo xereynta dakhliga.

Qodobka 5-aad

1. Hantidhawrka dawladdu tallaabo sharci ah ayuu ka qaadi karaa hay'addii ku xad-gudubta xeerarka iyo habraacyada u degsan maamulka lacageed ee maaliyadda dawladda.

Qodobka 6-aad

1. Waxaa la buriyey Sharci/Xeer kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaya xeerkan.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda Puntland

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT